

# Qoritaanka Qorshaha Ganacsiga

Somali



fikradda

qorsheynta

xeelada

guusha

Hagaha Tallaabada Ka Tallaabada ah  
ee Loogu Talagalay Guusha

## JADWALKA TUSMADA

<b>XARUMAHA HORUMARINTA GANACSIYADA YARYAR EE MAINE</b>	<b>1</b>
<b>BOGGA CINWAANKA</b>	<b>3</b>
<b>GUUDMARKA</b>	<b>4</b>
<b>JADWALKA TUSMADA</b>	<b>5</b>
<b>SHARRAXAADA GANACSIGA</b>	<b>6</b>
<b>HAWLGALLADA IYO GOOBTA</b>	<b>7</b>
<b>BADDEECOYINKA IYO ADEEGYADA</b>	<b>8</b>
<b>FALANQEYNTA SUUQA/WARSHADA</b>	<b>9</b>
<b>LOOLLANKA</b>	<b>10</b>

*Afeef: Ganacsiyada loo adeegsaday qalabkan waa shirkado aan jirin oo ay abuureen Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine ( Maine Small Business Development Center, Maine SBDC) si ay u muujiyaan qaybaha ugu waaweyn ee Qorshaha Ganacsiga. Sinnaba uguma turjumayaan ama uma matalayaan shirkado la yaqaano. U ekaansho ama isku mid u ekaansho kasta oo ganacsi kale oo dhab ah waa mid aan ula kac ahayn. Qalabkan waxaa loo isticmaalayaa dukumeenti wax laga barto ahaan oo keliya.*



## **Xarumaha Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine**

### ***Dhisidda Mustaqbalka Maine, Hal Ganacsi Marba Marka Xigta***

Haddii aad ka fikirayso wax ku saabsan **qoritaanka qorshaha ganacsiga** dabcan waxaad qabtaa su'aalo badan. Taasina waa wax fiican. Waxaad rabtaa inaad ku guulaysato ganacsigaaga oo aad dareento karti iyo kalsooni inaad u leedahay waxa aad qabanayso. **Waa wax muhiim ah.** Xarumaha Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine (Maine SBDC) ayaa fahamsan.

**Waan kaa caawin karnaa.** Xarunta **Maine SBDC** waxay la-talin ganacsi oo bilaash ah siinaysay ganacsiyada yaryar iyo hal-abuureyaasha ganacsi ee Maine tan iyo 1977. Waxaan leenahay la-taliyeyaal ganacsi oo la xaqiijiyay oo khibrad iyo aqoon leh kuwaasoo ka caawin kara ganacsiyada heer kasta ay ahaadaanba inay ku kaalmada horumarinta ganacsiga oo qarsoodi ah, la gaar yeelay – **kharash la'aan.**

**Taasi waa sababta aan adiga kuugu samaynay qalabkan.** Qorista qorshe ganacsi waa tallaabo muhiim ah oo lagu bilaabo ama balaariyo ganacsi kasta. Wuxuu caawiyaa mulkiila-ha(yaasha) ganacsiga iyadoo la habaynayo macluumaadka qeexaya ganacsiga iyo hawlgalkiisa. Sidaas oo kale, wuxuu u noqdaa hage samaynta qorshayaasha xeeladeed si loo horumariyo ganacsi ama si wanaagsan loogu maareeyo ganacsi jira. Qorshaha ganacsi wuxuu sidoo kale bixin karaa macluumaad ay tahay in loo soo bandhigo bangiga ama maalgashadeyaasha kale kahor inta go'aan deyn aan la gaarin. Haddii aad u isticmaasho lacago kuu gaar ah ama lacago aad soo amaahatay si aad u bilowdo ama u balaariso ganacsigaaga, abuurista macluumaad la isku halayn karo oo dhamaystiran oo qorshaha ganacsiga ah waa lama huraan.

Qalabkan waxaa sida ugu fiican loola isticmaalaa la-taliyaha ganacsiga ee Maine SBDC ama xirfadle kale.

Xarumaheena waxay ku yaalaan gobolka oo dhan. Naga soo wac lambarka **800-679-7232** si aad u ogaato sida aan kuu caawin karno ama booqo mareegta: **[www.mainesbdc.org](http://www.mainesbdc.org)** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama **Codso La-talin.**



# Bogga Cinwaanka

Bogga Cinwaanka waa shay inta badan la iska indhatiro oo ku jira Hageyaasha Qorshaha Ganacsiga oo badan. Bogga Cinwaanka waa macluumaadka ugu horreeya ee la arko ee u dhexeeya ganacsigaaga iyo amaahiyaha, caymiyaha, mulkiilaha raasumaalka ama maalgaliye kasta oo suurtagal ah. Waa inuu ahaadaa Bog Cinwaan oo hufan, soojiidasho leh, oo gaaban.


Bogga Cinwaanka wuxuu u shaqeeyaa sida kaarka ganacsi ee loogu talagalay ganacsigaaga – awood u leh inuu muujiyo macluumaadka lama huraanka ah si qof kasta u fahmo sida laguula soo xiriiri karo.

Hubi in magaca ganacsigaagu inuu horay iyo bartamaha jiro. Haddii soojeedintan la saarayo miis, waa inay dadku si cad u arkaan magaca.

Xusuusnow inaad ku darto macluumaadkaaga xiriirka. Ha ku qasbin akhristuhu inuu raadiyo macluumaadkaaga xiriirka, uga dhig mid sahlan inta suurtoogalka ah inuu helo jawaabtaas.

Werinta

Soojeedinta



**Pete's Seats**

Tiyaatarka Aflaanta, Ku Celiska ah  
Qoyska Diirada Saaraya

Loo Gudbin Doono  
Bangiga Imaginary Savings

**Pete's Seats LLC**  
Peter MovieLover, Owner  
597 Main Street  
Gorham, Maine 04038  
(207) 000-0000  
[Peter.MovieLover@gmail.com](mailto:Peter.MovieLover@gmail.com)  
[www.Pettesseats.com](http://www.Pettesseats.com)

Markaad hsamaynayso qorshaha ganacsiga, waxaad rabi doontaa inaad ogaato werintii ugu dambaysay. Tani waxay si gaar ah ayay waxtar u leedahay si loo hubiyo in qof kasta oo ku lugta leh u hasyto isla werinta.

Aqoonso oo gaar yeel warbixinta si ay u muujiso cidda aad u gudbinayso warbixinta.

Qorshayaasha ganacsiga waxaa sida caadiga ah loo sameeyaa oo loo qoraa laba sababood oo aasaasi ah:

- Hage Jira – hage shirkadda gudaheeda lagu isticmaalo oo kaa caawinayo **ADIGA** inaad fahamto ganacsigaaga
- Soojeedin Maaliyadeed – hage shirkadda bannaankeeda lagu isticmaalo oo ka caawiyo **DADKA KALE** inay fahmaan ganacsigaaga Hubi inaad si habboon u asteeyso bogga cinwaanka.

Mulkiilayaasha ganacsi ee doorbidaya in qorshayaashooda ganacsi si adag loo qariyo, waxaad ugu dari kartaa afeef Bogga Cinwaanka oo ay la socdaan jumladahaan: “Qorshahan ganacsi waxaa loogu soo gudbiyay si qarsoodi ah shakhsiyad gaar ah. Qorshahan ganacsi waa inaan dib loo daabicin ama loogu qeybin dad kale iyadoo aan oggolaansho cad laga helin qoraaga.”

*Tabaha Ganacsiga: Istimaal bog cinwaan balaastiig ah oo cad markaad jaldi gelinayso Qorshaha Ganacsiga si aad ugu soo bandhigto bangiga. Sidaas, haddii Qorshaha Ganacsiga la saarayo miis, ayaa bogga cinwaanka si sahlan loogu arki doonaa uuna ku soo jiidan doonaa dareenka qofka.*

# Guudmarka

Guudmarka ayay u badan tahay inuu noqdo qeybta ugu koowaad ee qorshaha ganacsiga ee maalgeliyaha la filan karo inuu akhriyo. Waa muhiim in lagu daro macluumaad buuxa oo loogu talagalay akhristaha si uu u fahmo ganacsigaaga iyo inuu xiiseeyo sida ay ugu habboon yihiin qorshayaashaada. Si kasta oo aad u buuxiso qeybaha Qorshaha Ganacsiga, qeybta Guudmarka waa inay had iyo jeer noqoto qeybta dib-u-eegista ugu dambeysa lagu sameeyo kahor inta aan qorshaha loo dirin maalgeliyaha.

Guudmarka waa inuu soo koobo (iyadoo lagu celcelin) qoddobada ku jira guud ahaan Qorshaha Ganacsiga.

Guudmarka waa inuu ka jawaabo gundigga:

Waxa, Sabab, Cidda, Goorta, iyo Goobta Ganacsigaaga.

Saddex qaab qoraaleed oo caadi ah oo aad isticmaali karto si aad u qorto Guudmarka waa:

- A) **Sookoobista Dulucda – (Inta Badan La Adeegsado)** Waxay soo koobtaa qorshaha ganacsiga ee guud, waxay xoog isku mid ah saartaa fikradda iyo hawlgallada ganacsiga
- B) **Sookoobista Sheekada –** U eg sheeko, inta badana xoogga saaraysa dhibaataada iyo fikradda
- C) **Warqadda Cinwaanka –** In badan u eg Sookoobista Dulucda, balse loo qoray sidii warqad rasmi ah

## Guudmarka

Celceliska kharashka ee qoyska Ameerikaanka ah ee saddexda qof ah si ay u aadaan filimaanta fiidkii ka socda ee aagga Greater Portland waa \$35.85 bulyeetiyaada oo keliya. Qaloonka weyn iyo soodhada waxaa ku bixi doona \$20 kale celcelis ahaan. Tani waxay ka dhigtay daawashada filimanta inay aad qaali u yihiin waxayna keentay inay kordhaan qoysaska maalgashanaya telefishinada qaalgiga ah iyo adeegyada filimaanta ee guriga ama adeegyada baahinta.

Shirkadda Pete's Seats waa tiyaatarka aflaanta ku celiska ah, qoyska diirada saaraya, ee ku yaala Aagga Greater Portland. Peter Movie lover, mulkiilaha gaarka ah iyo maareeyaha, ayaa ku biirin doona in ka badan 19 sano waayo-aragnimo ah warshadaha tiyaatarka filimaanta si uu u abuurdo ganacsigan Shirkadda Mas'uuliyadda Xaddidan Leh (LLC).

Shirkadda Pete's Seats ayaa noqon doonta tiyaatarka aflaanta ku celiska ah, saddexda shaashad leh, oo loola jeedo in filimaanta laga shido ay noqon doonaan kuwaan laga daawan shaashadaha kooxaad ee tiyaatarada aflaanta cusub balse weli aan u soo bixin cajal ahaan ama khadka laga daawan. Kharashka bulyeetiga filimaanta ee noocaas ah aad ayuu uga yar yahay filimaanta diyaarka u ah markii ugu horraaysay inay dadweynunu daawadaan. Tani waxay u oggolaan doontaa Shirkadda Pete's Seats inay ku siiso bulyeetiyaada filimaanta fiidkii \$5 qofkiiba iyadoo weli la joogteynayo faa'idada saafida ah.

Si loo aasaaso Shirkadda Pete's Seats, wadar dhan \$653,000 ayaa loo baahan doonaa, iyadoo Peter Movie lover uu gelin doono \$130,600 (20%) iyo amaah 15 sano ah oo laga helayo Bankiga Savings Imaginary oo dhan \$522,400 (80%). Lacagtaasi, \$300,000 ka mid ah waxaa loo adeegsan doonaa in lagu iibiyo dhisme, \$200,000 ayaa loo baahan doonaa si dhismaha looga dhigo tiyaatar, \$120,000 ayaa loo baahan doonaa si loo helo qalabka iyo alaabta guriga, \$33,000 ee soo hartayna waxaa loogu baahan doonaa raasumaal hawl-socodsiiin ahaan. Dhismaha iyo qalabka (qiimaha ugu dambeeya waa \$620,000) ayaa rahan u noqon doonaan amaahda.

Bogga 1

Sookoobisyada Guudmarka ee ugu guulaysiga badan waxay ka kooban yihiin saddex qaybood:

- 1) Dhibaato si cad loo qeexay ama sharraxaada ku saabsan xaaladaha hadda jira ee abuuray baahida loo qabo baddeecadaada ama adeeggaaga.
- 2) Wuxuu dhigaa ama sharxaa sida ganacsigu uu ugu noqon doono xal marka macluumaad guud laga haysto qaabdhismeedka ganacsiga.
- 3) Wuxuu muujiyaa faahfaahinada amaahdu wax ay yihiin; oo ay ku jiraan wadarta amaahda, isticmaalka kooban ee lacagaha, rahanta u ah amaahda, iyo cidda ku lugta leh heshiiska.

Waa inaad samayso Guudmar xamaasad leh, xirfad leh, dhammaystiran, oo kooban. Waa inuusan ka badan laba bog.

Ganacsiga cusub marka la samaynayo, Guudmarkaaga ayaa ah inuu gudbiyo sababta baddeecadaada ama adeeggaaga cusub loogu baahan yahay oo u guulaysan doono. Waa maxay waxa aad soo bandhigayso ee gaarka ah? Ganacsiyada horay u sii jiray ama sii fidaya, Guudmarkaaga ayay tahay inuu gudbiyo sababta ganacsigaagu u sii guulaysan doono.

*Tabaha Ganacsiga: Markaad keydiso werinta elektirooniga ah ee ugu dambeeya ee qorshahaaga, had iyo jeer u xafid qaab PDF ah. Qaabkan, iyadoo aan la eegin barnaamijka loo adeegsado in lagu furo Qorshaha Ganacsiga (Mac, Windows, Android), ayay dhammaan qabaynta u noqon doontaa sida aad ugu talagashay.*

# Jadwalka Tasmada

Jadwalka Tasmada waa qaab aad ugu oggolaanayso akhristahaaga inuu fahmo macluumaadka ku jiri doona qorshaha iyo halka laga heli karo. Jadwalka Tasmada waa hage waxtar leh oo u oggolaado akhristeyaasha qaab ay ku aqoosadaan oo ay ku helaan macluumaadka gaarka ah ee ku saabsan qorshahaaga iyagoo aan baarin bog kasta oo qorshaha oo dhan. Bangiga ama amaahiyaha ayaa akhrin doona Guudmarka marka hore kadibna rabi doona inuu tago qayb gaar ah oo ka mid ah qorshaha ganacsiga, oo ay u badan tahay qeybta maaliyadeed.

Jadwalka Tasmada waa inuu ahaado mid wax toos u abaaro.

Jadwalka Tasmada waa hab degdeg ah oo uu akhristuhu ku hubin karo inaad xustay dhammaan macluumaadka loo baahan yahay ee go'aanka lagu gaari doono.

Qeybta ugu dambeysa ee Qorshaha Ganacsiga waxaa ku jiri doona Lifaaq kaasoo aad ku bixin karto macluumaad kasta oo dheeraad ah oo ku saabsan ganacsigaaga.

<b>Jadwalka Tasmada</b>	
Guudmarka	1
Jadwalka Tasmada	2
Sharraxaada Ganacsiga	3
Hawlgallada & Goobta	4
Baddeecooyinka & Ganacsiyada	5
Falanqeynta Suuqa/Warshada	6
Loollanka	7
Xeelada Suuqeynta	8
Maamulka	9
Xaaladda Maaliyadeed	10-14
a. Isha & Isticmaalka Lacagaha	10
b. Qoraal Xisaabeedka Dakhliga	11
c. Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha	12
d. Dheelitirka Xisaabaha	13
e. Falanqeynta Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha/Saamiqeybsiyada	14
Lifaaqa	15

Xusuusnow inaad hubiso inaad si sax ah ugu yeesho lambarro boggaga Qorshaha Ganacsiga si ay ugu beegmaan Jadwalka Tasmada.

Qeybta Maaliyadeed ee Qorshaha Ganacsiga waxay ka koobnaan doontaa waxyaabo badan. Tani waxay la dhihi karaa waa mid ka mid ah qeybaha ugu muhiimsan ee Qorshaha Ganacsiga, markaa waa inaad u muujiso akhristaha inaad fahamtay oo aad hayso waxyaabaha ay u baahan doonaan.

Shaxda Tasmada ee sare waa tusaale. Ganacsigaagu wuxuu ka koobnaan karaa qaybo badan ama yar iyadoo ku xiran tahay waxa ku habboon ganacsigaaga. Sida kor ku xusan, Qeybta Maaliyadda ee qorshaha ganacsiga waa qayb ay si weyn u dhawraan amaahiyeyaasha. Inta badan amaahiyuhu ayaa akhrin doona Guudmarka si uu u fahmo fikradaada ganacsi waxa ay tahay marka hore k dibna isla markiiba aadi doona Qeybta Maaliyadda. Sababtan awgeed, waxaan soojeedinaynaa in Qeybta Maaliyadda laga dhigo qeybta ugu dambeysa. Sidaas, ayuu akhristuhu ku arki doona shaqada aad qabatay oo dhan markuu tago dhammaadka qorshaha ganacsiga.

# Sharraxaada Ganacsiga

Qeybta Sharraxaada Ganacsiga waa inay muujisaa wax badan oo ka mid ah dhinacyada sharciga iyo farsamada ganacsiga. Qeybtan waa inay ka jawaabtaa “waxa” ganacsigu yahay. Waa inay muujisaa qaabdhismeedka shirkadeed ee ganacsiga, mulkiilayaasha maamulaha iyo xiriiradooda, iyo nooca warshada iyo ganacsiga. Tani waxaa ku jiri doona rukhsado, shatiyo, caymis, iyo/ama qawaaniin kasta uu ganacsigu u baahan yahay si uu u shaqeeyo.

Sharraxaada Ganacsiga waa inay qeexdaa mulkiiliyadda ganacsiga, si cad u muujiso nooca mulkiiliyadda, inta badana leedahay cinwaan si ay u muujiso halka ganacsigu ku yaalo.

Ganacsiyo badan ayaa rabi doona inay dib u milicsadaan Bayaanka Himiladooda. Bayaanka Himilada wuxuu caadi ahaan ka yar yahay 30 erey wuxuuna si kooban uga jawaabaa su'aalaha soo socda:

- Maxaan qabanaa?
- Sideen u qabanaa?
- Yaan u qabanaa?
- Maxaan soo kordhinaa?

Bayaanka Himiladaadu wuxuu kaa caawin doonaa inaad diirada saarto waxa ugu muhiimsan ee ganacsigu sameeyo.

## Sharraxaada Ganacsiga

Bayaanka Himilada: Shirkadda Pete's Seats waxay u soo bandhigi doontaa daawadeyaasha mahadho tayo sare lehe oo caadi ahaan laga helo filimaanta cusub iyadoo lagu daawanayo filimaanta ku celiska ah qiimo jaban.

Shirkadda Pete's Seats waxay noqon doontaa mid la aasaasi doono, Shirkadda Masuuliyadda Xaddidan leh oo halka qof leeyahay oo ka diiwaan gashan Gobolka Maine. Shirkadda Pete's Seats ayaa la filayaa inay furanto gudaha Juun 2019. Peter Movie lover ayaa noqon doona 100% mulkiilaha gaarka ah iyo maamulaha ganacsiga. Shirkaddu waxay gudbin doontaa Shirkad Dakhligiida La Canshuuro (S-Corporation) inay u canshuuraan Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS). Peter Movie lover wuxuu noqon doonaa shaqaale mushaar qaata oo ka tirsan shirkadda. Goobta la soojeediyay ee shirkadda Pete's Seats waxay ku taalaa 597 Main Street, Gorham, Maine 04038.

Shirkadda Pete's Seats waxay noqon doontaa tiyaatarka aflaanta ku celiska ah ee 3-da shaashad leh waxayna ugu horreyn noqon doonaa ganacsi tafariiq oo leh adeegyo xaddidan iyo xulashooyin cunto. Sidaas oo kale, Shirkadda Pete's Seats waxay lahaan doontaa shahaadada canshuurta iibka, waxay ka heli doontaa shati qeybiyayaasha si ay u muujiyaan filimaanta ku celiska ah, waxay heli doonaan shatiyo cunto oo ku habboon dukaanada cuntooyinka fudud, waxayna hubin doonaan in arrimaha badqabka nolosha oo dhan wax lagaga qabto qaabka tiyaatarka. Magaalada Gorham waxay si horudhac ah u ansixisay Rukhsadda Oggolaanshaha booska waxayna sugaysaa naqshada dhismaha si loo ansixiyo. Waxaa lagu qiyaasaa in shatiyada iyo rukhsadaha harsan ay qaadan doonto ku dhowaad 5 bilood si loo helo.

Shirkadda Pete's Seats ayaa si buuxda loo caymin doonaa waxayna ka heshay qaansheero Shirkadda Caymiska ee Movie'sRUS.

Bogga 3

Farqadda hore wuxuu ka koobnaan doonaa macluumaad sharciyeed iyo mulkiiliyad oo badan oo muhiim u ah amaahiyaha. Ogsoonow inaysan daruuri ahayn inaad aasaasto ganacsigaaga kahor inta aadan soojeedintaada u gudbin bangiga.

Waxaad u baahan doontaa inaad baarto oo aad wax ka qabato rukhsadaha, shatiyada, ama qawaaniinta loo baahan doono si aad u furto ganacsigaaga. Waa wax fiican inaad akhristaha fahamsiiso horusocodka aad samaysay ama waqtiga hadafka la filayo in la gaaro.

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, waxaad rabi doontaa inaad sharraxdo taariikhda ganacsiga. Goorma ayaa la aasaasay ganacsiga? Waa maxay isbeddelka jira? Ganacsigu si fiican ma u socdaa? Caadi ahaan waxaad fiirisaa taariikhda seddexdii sano ee la soo dhaafay oo ka bixi faallooyin ku saabsan sida ganacsigu wax u qabtay, sida aad u maleyneyso in ganacsigu noqon doono mustaqbalka iyo sababta. Isbeddelada (haddii ay jiraan) aad qorshaynayso inaad samayso?

Haddii aad iibsanayso ganacsiga, waxa aad doonaysaa inaad ku darto mawduucyada kor ku xusan oo sidoo kale si qoto-dheer u faahfaahi qiimaha ganacsigu iyo sida aad ku keentay xisaabtaas (tus, kala dhigdhiig dhismaha, dayactirka, qalabka, alaabaha, sumcadda ganacsiga, iwm).



# Hawlgallada iyo Goobta

Qeybta Hawlgallada iyo Goobta waa inay u oggolaataa akhristaha inuu si fiican u fahmo sida ganacsigan u shaqayn doono maalinba maalinta ka dambeysa. Qeybtan waa inay ka jawaabtaa goorta ganacsigu bilaabanayo iyo shaqaaaha loo baahan yahay si ay si buuxda ugu shaqeeyaan. Waa inay sidoo kale ku jiraan macluumaadka khuseeya doorbidaada goobta iyo faahfaahinta goobta ee aasaasiga ah.

Qeybtan ayaa loogu talagalay inay kaa caawiso inaad fahamto muddada hawlgalladaadu furnaan doonaan toddobaad kasta iyo inta shaqaale ee aad u baahan tahay inay diyaar u ahaadaan wakhtiyadaas. Intaas waxaa dheer, qeybtan waa inay kaa caawiso inaad eegto tafaasiisha goobta.

Waxaad u baahan doontaa inaad go'aamiso tirada xubnaha shaqaalaha ee aad u baahan tahay inaad shaqaalayso. Tani waxay noqon kartaa mid adag waxaana inta badan u soo jeedinaa mulkiilaha ganacsi ee mustaqbalka inuu sameeyo jadwal shaqaale oo tijaabo ah muddo toddobaad ah si loo hubiyo in la helo caymiska saxda ah saacadaha ganacsigu furan yahay.


## Hawlgallada iyo Goobta

Shirkadda Pete's Seats waxay shaqayn doontaa 7 maalmood isbuucii. Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee Isniinta ilaa Sabtida waxay ahaan doonaan 11:00 subaxnimo- saqda dhexe, iyadoo albaabada loo furi doono dadweynaha 11:30 subaxnimo, la xiri doono 10:00 galabnimo. Saacadaha Axadaha waxay noqon doonaan 11:00 subaxnimo – 10:00 galabnimo, iyadoo albaabada loo furi doono dadweynaha 11:30 subaxnimo, la xiri doono 8:00 galabnimo. Shirkadda Pete's Seats waxay oggolaan doontaa kireysiga tiyaatarka aflaanta, iyo munaasabada gaarka ah inta lagu gudajiro saacadaha shaqada laga nasanayo haddii loo baahdo.

Shirkadda Pete's Seats waxay u baahan doontaa 5 shaqaalaha waqtiga buuxa ah iyo 3 shaqaalaha waqti-dhimanka ah. Shaqaalaha wakhtiga buuxa waxay ka koobnaan doonaan maamule (mulkiilaha), kaaliye maareeye, 2 qof oo waqti-buuxa ka shaqeeyaan dukaanada cuntooyinka fudud, iyo 2 adeegayaal oo shaqeeyaan wakhti buuxa. 3-da shaqaale ee wakhti-dhimanka ah ayaa noqon doonaan kuwo socsocda ka shaqeeya aaggaga adeegaha iyo dukaanada cuntooyinka fudud iyadoo ku xiran baahida jirta. Mushaarka shaqaalaha wuxuu ka bilaaban doonaa \$12/saacad kasta.

Shirkadda Pete's Seats waxay ku yaali doontaa 597 Main Street, Gorham Maine. Shirkadda Pete's Seats ayaa lahaan doonta dhismaha ganacsi ee la qeybiyay, ee daboolay shuruucda badqabka dabka iyo shuruudaha gaari baarkimida. Sida ku cad warbixinta qulqulka gaadiidka MDOT, in ka badan 10,000 gaari ayaa goobtan mara maalin kasta. Goobtan waxay 9 mayl ka baxsan tahay bartamaha magaalada Portland waxayna 3 mayl u jirtaa Xarunta Gorham Center. Goobtan waa meel lagu horumari karo mustaqbalka.

Imminka dhismuhu waa dhisme ganacsi oo dhan 20,000 cag oo laba jibbaaran. Dib-u-dayactirada lagu wanaajinayo laguna qalabaynayo xarunta si ay u qaado 3 shaashad (425 kursi), musqulo, xafiis, bakhaar, iyo aaggaga dukaanada cuntooyinka fufuf ayaa lagu qiyaasayaa \$320,000. Eeg lifaaqa si aad u hesho naqshadaha dhismaha ee faahfaahsan, qiyaasaha qandaraaslaha, iyo liiska qalabka/alaabta.



Farqadda koowaad waa inay si cad u sheegtaa waqtiga ganacsigu loo furi doono hawlgallada caadiga ah inta lagu gudajiro isbuuc kasta ama waqti kasta.

Qeybta goobta ee ku taala boggan waa inay muujisaa qaar ka mid ah macluumaadka aasaasiga ah, sida inaad kireysanayso ama iibsanayso, qulqulka gaadiidka, kala-qeybinta goobta, iyo u dhawaanshaha goobaha kale ee soojiidashada leh (sida goob weyn oo ku taala bartamaha magaalada). Haddii ganacsigu onlayn keliya yahay, markaas waxaad muujin kartaa in goobtu aysan ahayn arrin muhiim ah.

Mararka qaarkood ku darida sawirka qaabka goobta la soojeediyay ama khariidad yar oo deegaanka ah ayaa ka caawisa akhristaha inuu muuqaal ka qaato sida ganacsigu u ekaan karo ama halka uu ganacsigu ku yaalo.

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaas waxaad rabi doontaa inaad sharraxdo hawlgallada socda iyo isbeddelo kasta oo mustaqbalka. Ganacsigu ma ballaarin doonaa adeegyada ama baddecooyinka? Ma dhici doonaan baahiyaha kordhinta ama dhimista shaqaalaha? Ma la beddeli doonaa goobta ganacsiga?

Haddii aadan weli goobta go'aamin, waxaad qori kartaa goob guud oo leh shuruudo u baahan in la buuxiyo; sida "Goobta ganacsiga la soojeediyay waxay noqon doontaa... xx mayl meel u jirto bartamaha magaalada Portland, ama waxay ku taali doontaa meel waddo leh oo celcelis ahaan maraan xxx gaadiid maalin kasta, ama waxay ku taali doonaa dhisme celcelis ahaan kharashkiisa cag kasta oo laba jibbaaran yahay xx".

*Tabaha Ganacsiga: Shaqaalaha iyo goobta ayuu ku faa'idi karaa ama ku burburi karaa ganacsiga. Inta badan, mulkiilayaasha ganacsiga ayaa isku dayaan inay "ka shaqaysiiyaan" beddelkii ay waqti badan gelin lahaayeen inay ka fiirsadaan dooqyada marka wax la bilaabay.*

# Baddeecooyinka & Ganacsiyada

Qeybta Baddeecadaha iyo Adeegyada waa in lagu muujiyaa waxa ganacsigaagu qabto. Waa inaad qeybtan ku bilowdaa baddeecada ama adeegga ganacsigu inta badan bixin doono. Waxa ugu weyn ee ganacsigaaga inta badan soo bandhigi doono waa baddeecada ama adeegga soo saari doonaan dakhliga ugu badan ee ganacsiga ama waxa macmiilku marka hore ka fikirayo ee ku saabsan ganacsigaaga. Hubi inaad u oggolaato akhristaha inuu aragti cad ka helo waxa aad qorshaynayso inaad samayso iyo sida aad u qaban doonto. Qiimaha aad soojeedisay ee baddeecadaada ama adeegyadaada waa in lagu xusaa qeybtan.

Waxaad bilaabi kartaa qeybtan adigoo ku celcelinaya waxa u gaarka ah ganacsigaaga. Waxa u gaarka ah ganacsigaaga waa baddeecada ama adeegga ee ka dhigi kara ganacsigaaga inuu la loolamo ganacsiyada kale.

Isku day inaad hubiso in qiimaha aad ku dallaci doonto baddeecadaada ama adeeggaaga daboolayo waxyaabahaan:

- Kharashaadka alaabta ama maaddada
- Kharashaadka shaqaalaha
- Kharashaadka Socodsiiinta Hawlaha
- Canshuuraha (qiyaas 25-30%)
- Faa'idada Saafida ah ee La Rabo

Waqti ka dib, kharashaadka ganacsiga ayaa kordhi doonaan, marka xasuusnow inaad samayso korodhinta qiimaha caadiga ah waqti kadib.

## Baddeecooyinka iyo Ganacsiyada

Shirkadda Pete's Seats ayaa ugu horeyn soo bandhigi doonta mahadhooyinka tiyaatarka aflaanta ee caadiga ah ee filimaanta caanka ah. Mahadhada waxay noqon doontaa mid la mid ah isla mahadhada laga filayo tiyaatarka aflaanta cusub, balse lagu helayo qiimo jaban.

Filimaanta la soo bandhigo waxay caadi ahaan noqon doonaan filimaan ka baxay tiyaatarada filimaanta cusub iyo kahor inta aysan diyaar u noqon daawashada Celcelis ahaan, muddadan waxay ka bilaabataa 1 bil laga marka laga joogo daawashada koowaad ee filimka ee ka baxo tiyaatarada waxayna dhammaataa 2-3 bilood kadib daawashada koowaad. Shirkadda Pete's Seats waxay heli doontaa shatiga iyo filimaanta iyadoo loo marayo Criterion, Swank iyo MPLC (eeg lifaaqa loogu talagalay qiimaha). Dhammaan bulyeetiayada waxay noqon doonaan \$5 qofkiiba waxaana la filayaa inay ku siyaado \$0.25 labadii sanaba mar.

Shirkadda Pete's Seats waxay ku siin doontaa kuraas fadhi ah oo raaxo leh. IyadoQo ugu wacan muhiimadda ay leeyihiin kuraasta, Shirkadda Pete's Seats ayaa qorsheynaysa inay soo iibiso kuraas heerkoodu dhexeeya ilaa sareeya marka lala barbardhigo kuraasta heerkoodu hooseeyo (fiiri Lifaaqa loogu talagalay qiimaha).

Shirkadda Pete's Seats waxay ku shaqayn doontaa tiyaatarka iyadoo adeegsanaysa keliya filimaanta dhijitaalka ah iyo filimaanta kamaradaha dhijitaalka ah lagu duubay. Tani waxay si weyn u dhimi doontaa kharashka filimaanta sida caadiga ah muddada gaaban socda ee u baahan in loo soo dhoofto si sugan oo dheeraad ah oo la isku geeyo. Taas beddalkeeda, Shirkadda Pete's Seats waxay awoodi doontaa inay soo dejiyo filimaanta markay hesho shatiyada ku habboon. Diirad saarida dhijitaalka ayaa u oggolaan doonta Shirkadda Pete's Seats inay bixiyaan xulashooyin badan, sida habbeennada ciyaaraha.

Shirkadda Pete's Seats ayaa diyaari doonta cuntooyinka fudud ee ka kooban qaloonka, soodhada, iyo nacnac (eeg Lifaaqa loogu talagalay liiska la soojeediyay iyo qiimaha). Shirkadda Pete's Seats waxay la shaqayn doontaa alaab-qeybiye ku sugan Boston, Massachusetts si ay u hesho soodhooyinka, istaraaashooyinka, cawksa, koobabka, kartoonaada qaloonka, nacnaca, iyo galleyda. Shirkadda Pete's Seats waxay Square u adeegsan doona nidaamka POS ahaan. Kharashka qaloonka weyn iyo soodhada weyn ee sida caadiga ah isla socda ayaa noqon doona \$12.50 iyadoo celceliska Kharashka Alaabta tahay 15%.

Shirkadda Pete's Seats ayaa qorsheynaysa inay soo bandhigto inay awooddo kireynta tiyaatarka saacadaha shaqada iyo hal shaashad sida suurtagalka ah inta lagu gudajiro saacadaha caadiga ah. Khidmada kirada tiyaatarka caadiga ah waa \$250/saacad kasta ama \$300/filim kasta 90 daqiiqad kasta.

Bogga 5

Inkastoo aad si dhab ah u xusi karto kharashaadka, waxaa qeybtan diiradda lagu saarayaa soo bandhigida DAKHLIGA. Goobta ugu fiican ee lagu faahfaahiyo Kharashaadka ayaa noqon karta qeybta saadaashaada maaliyadeed oo wata agabka taageeraya ee ku jira Lifaaqa. Beddel ahaan, ganacsiyada qaarkood ayaa kuu sheegi doona faa'iidada saafida ah ee la filayo marka loo geeyo qiimaha ay ku qoreen qeybtan.

Tilmaamaha farsamo, lacag-bixinada, sawirrada, liiska cuntooyinka ee tusaalaha ah, buug-yaraha iibka iyo waxyaabaha kale ee waaweyn ayaa lagu xusi karaa oo lagu dari karaa Lifaaqa.

Kadib markaad wax ka qabato baddeecada ama adeegga abuuraya dakhliga aasaasiga ah ee ganacsiga, waxaad markaa faahfaahin ka bixin kartaa wax kasta oo dheeraad ah ama adeegyada dakhliga kordhinaya.

Qaybtan ka midka ah qorshaha waa inay la mid noqotaa ganacsiga cusub ama ganacsiga jira. Wixii qeybtan ah, waa inaad khibrad u leedahay balse ku qor ereyo qofka caadiga fahmi karo. Isku day inaad isticmaalin ereyo ama kelmado aad ugu gaar ah warshada ama loo gaar yeelay Haddii ay tahay inaad isticmaasho kelmadaha noocaas ah, si cad u cadee macnaha kelmadahaas marka ugu horreysa ee aad isticmaasho kelmada. Ka soo qaad in akhristuhu uusan aqoon u lahayn warshadaada. Ganacsiyada qaarkood waxay u arkaan mid waxtar leh inay u qoraan qeybtan sida adigoo la hadlaya macmiil cusub oo mustaqbalka ah.

*Tabaha Ganacsiga: Ganacsiyada qaarkood waxay ku fikiraan inay ku bixiyaan baddeecadahooda ama adeegyadooda qiimo hoose si ay faa'ido u helaan gelitaanka suuqa marka ugu horreysa ee la bilaabo. Beddelkii aad ku bixin lahayd qiimo hoose, bixi qiimo dhimis kumeelgaar ah. Qaabkan ayaad macmiilka ugu soo bandhigaysaa qiimo dheeraad ah, qiimo-dhimista ayaa bixisa xeelad suuqgeyn oo sahlan, oo qof walba wuu fahmayaa waxa beddeecooyinkaaga ama adeegyadaada ku kaci karaan sida caadiga ah.*

# Falanqeynta Suuqa/Warshada

Qeybta Falanqeynta Suuqa/Warshada waa inay ka caawiso akhristaha inuu fahmo macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan ganacsiga. Qeybtan waxaa loo isticmaalaa in lagu aqoonsado suuqa, xajmigiisa, kobociisa, iyo isbeddellada warshada. Tusaalooyinka macluumaadka ay tahay inaad ku darto waa qiyaasta cabbir (sida caadiga ah waxaa lagu sheegaa wadarta lacagta la kharash gareeyo sannadkii), iibka ama isbeddellada koboca ee dhow, iyo aragtida koboc ee mustaqbalka la filayo.

Ganacsiyadu waa inay uga fikiraan qeybtan sidii shaandho oo kale. Ku bilow aragti ballaaran oo ku saabsan warshada, oo noqo mid si tartiib ah diiradda u saaro suuqa ganacsigaaga markaad bogga hoos u aado. Tusaale ahaan:

Isbeddellada Warshadaha ee Qaranka Isbeddelada Warshadaha ee New England Isbeddellada Warshadaha ee Maine Isbeddalada Ganacsi ee Gobolka

Ganacsiyada onlaynka ah ama caalamiga ah ayaa laga yaabaa inay lahaadaan xitaa aragti ballaaran, laga bilaabo suuqa guud ee caalamka kadibna aragti la koobay oo ku saabsan suuqa ay qorsheynayaan inay u adeegaan ama wax u dhoofiyaan.

## Falanqeynta Suuqa/Warshada

Sida laga soo xigtay IBISworld.com (Oktoobar 2018), warshadaha tiyaatarka filimaanta ee Maraykanka (Koodhka NAICS 512131) ayaa kobceen 5-ti sano ee la soo dhaafay. Gaar ahaan 2018 ayaa fiinaa iyadoo Forbes.com qoreen gudaha July 2018 in iibka bulyeetiyaada filimaanta uu kor u kacay dhowaad 8% in ka badan 2017 oo uu gaari doono \$18 bilyan gudaha 2018. Warbixinta Falanqeynta Filimaanta 2018 waxay muujinaysaa in dakhliga warshadaha ee sanadlaha ah lagu qiyaasay inuu kordhayo 3.1%.

Sida laga soo xigtay warbixinta SBDC.net ee laga helay Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine, tiyaatarada filimaanta ee ku yaala New England ayaa arkeen faa'iido aan kala sooc lahayn oo ka badan tan saddexdii sano ee la soo dhaafay marka loo eego dalka intiisa kale. Maqaal ay qoraheen Critics Movie oo ku jiray isla warbixinta SBDC.net ayaa lagu xusay in warshadaha tiyaatarada filimaanta ee ku yaala New England ay diyaar u yihiin inay kobcaan 4-5% sanadkii iyadoo celcelis ahaan macaamiishu ay kharash gareynayaan \$30 booqasho kasta.

Waxaa jiray hoos u dhac heer dal ah oo ah -0.2% ahaa oo khuseeyay tirada ganacsiyada ku jira warshadaha tiyaatarada filimaanta. Si kastaba ha noqotee, marka la eego Xaqiiq Raadiyaha Tirakoobka Mareykanka, tirada ganacsiyada tiyaatarada filimaanta ee Maine ayaa ahaa kuwo aan 33 ka badan 5-tii sano ee la soo dhaafay.

Cilmi-baaris dheeraad ah ayaa muujisay in macaamiisha ku sugan Maine intooda badan ay safri doonaan celcelis ahaan 20-25 daqiiqo (qiyaastii 15 mayl) si ay u helaan madadaalada ama mahadhooyinka wax iibsiga. Iyadoo la adeegsanayo xogta Tirakoobka Mareykanka ee 2010, dadka deegaanka ee u jira 15-mayl oo gacan goobta Shirkadda Pete Seats waa 274,316. Intaas waxaa dheer, sida laga soo xigtay Mainebiz.com, qiyaastii 5.4 milyan oo dalxiisayaal ah oo yimid Greater Portland gudaha 2016 ayaa ku jiri lahaa gudaha gacankan.

Bogga 6

Helitaanka qiyaasta koboca sanadlaha ah waxay ka caawin doontaa inaad taageerto saadaashaada sanadka 2<sup>aad</sup> iyo 3aad.

Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine waxay ka dalban kartaa warbixinta cilmi-baarista caadiga ah *SBDC.net* si ay kaaga caawiso Falanqeynta Suuqa/Ganacsiga.

HA ISKA indha tirin calamadaha digniinta ah oo aad ogaato inta lagu gudajiro cilmi-baaristaada. Waxaad u baahan doontaa inaad fahamto oo aad wax ka qabato isbeddel kasta oo xun. Ujeeddada qorshaha ganacsiga ayaa ah in lagugu qanciyo adiga in ganacsigaagu macquul yahay.

Intaas waxaa sii dheer, amaahiyaha ayaa ku ogaan doona macluumaadkan cilmi-baaris u gaar ah. Helitaanka isbeddel kasta oo taban ayaa marka hore ku siinaysa fursad aad ku sharraxdo sida ganacsigaagu uga gudbi doono isbeddelladaan.

Waxaa jira laba nooc oo cilmi-baarista suuqa ah oo aad ku dari karto qeybtan:

**Cilmi-baarista Suuqa ee Koowaad** – Tani waa marka aad uruuriso horxog gaar ahaan ku saabsan ganacsiga aad soo jeedisay. Tani waxay noqon kartaa tirinta qulqulka gaadiidka, natiijooyinka aad ka hesho wax soo iibsiga sirta ah, sahannada macaamiisha ee la filan karo ee adiga kuu gaarka ah, iwm. Cilmi-baarista waxaa inta badan loo qaabeeyay ujeeddooyinkaaga.

**Cilmi-baarista Suuqa ee Labaad (inta badan la adeegsado)** – Tani waa macluumaadka aad u heli karto si guud ee ku saabsna suuqa ama warshada. Inta badan, macluumaadkan wuxuu ka yimaadaa keyd-xogedyada, maqaallada, buugaagta, ama internet-ka. Rugaha Ganacsiga, Maktabadaha, Ururrada Warshadaha ama Ganacsiga, ama dhigaalada Dawladeed waa ilo horxogeed oo wanaagsan.

*Tabaha Ganacsiga: Ganacsi kasta waxaa kala dhigdhigo NAICS (Nidaamka Kala Soocida Warshadaha ee Waqooyiga Mareykanka) koodh lambar. Markaad baarayso, waa inaad marka hore go'aamisaa waxa koodhka NAICS ee warshadaadu yahay. Lambarkan ayaa ku caawin doona haddii aad la geliso ereyada raadinta muhiimka ah markaad internetka ka raadinaysa macluumaadka warshada.*

# Loollanka

Qeybta Loollanka waa in lagu qeexaa ikhtiyaarada jira ee loogu talagalay macmiilkaaga mustaqbalka. Qeybtan waa inaysan muujin keliya loollanka tooska ah (tusaale ahaan ganacsiyada la midka ah kaaga) balse sidoo kale waa inay muujisaa loollan kasta oo kale oo aan toos ahayn (tus, waxa ay yihiin ikhtiyaarada kale ee uu heli karo macmiilkaaga mustaqbalka). “Loollanka” daruuri ma ahan inuu ku saabsanaado nooca ganacsiga. Loollanka waa lacagta macaamiilku kharash garayn doono. Macmiilku wuxuu lacagta ku kharash garayn doonaa ganacsigaaga, ama wuxuu lacagta ku kharash garayn doonaa ganacsi ama dooq kale. Tusaale ahaan, haddii aad soojeedinayso inaad furto dukaanka lagu iibiyo bur dhiidhiil subaxdii, markaas loollankaagu wuxuu noqon doonaa beddel kasta oo jira (oo ay ku jiraan dukaamada kale ee bur shiishiil) ee macaamiishu go'aansan karaan – dukaanka doolshada, rootiga, cuntada fudud, iwm. Qeybtan waa inay muujisaa **3**-da ugu sare balse aan kama badnaan karto **5**-ta ama **6**-da loollame ee ugu sarreeya.

Marka hore waa inaad go'aamiso inta uu la ekaan doono aagga hawlgallada ganacsigaaga dabooli doono. Wixii goobaha jira ah, kani caadi ahaan waa celceliska waqtiga gaari wadista ee aad u malayso in macaamiilku ku imaan doono si uu u helo baddeecadahaaga ama adeegyadaada.

Wixii ganacsiyada onlaynka ah oo kaliya ah, kani caadi ahaan waa goob juqraafiyeed, inta badan waxaa lagu go'aamiyaa awoodda aad u leedahay inaad baddeecadaha soo rarto ama bixiso adeegyada.

Marnaba ha dhammeystirin qeybta loollanka adigoo aan qeexin buro-dheeriga ganacsigaagu ku yeelan doono loollanka. Sharrax sababta qof u dooran doono baddeecadaada ama adeeggaaga inkastoo uu haysto dooqyo kale oo yaala suuqa.

## Loollanka

Waxaa jira shan ikhtiyaarada tiyaatarada filimaanta ah oo ka jira 15 mayl oo gacan gudahooda (25-30 daqiiqo gaari wadis ah) goobta ganacsi ee la soojeediyay. Laba ka mid ah xulashooyinkan waa tiyaataro xilliyeed, masraxyo baabuur lagu tago. Saddexda loollame ee hoos ku xusan ayaa loo arkaa inay yihiin loollameyaasha ugu dhow.

**Big Screen Cinemas**, 886 Roosevelt Trail, Windham, ME 04062 (12.6 Mayl) – Shaneemooyinka Big Screen Cinemas waa tiyaatarka aflaanta cusub ee la aasaasay markay ahayd 2005 ee leh 4 shaashadood. Celcelis ahaan qiimaha bulyeetiga dadka waaweyn waa \$11.50 ee loogu talagalay showga fiidkii oo celcelis ahaan xirmada cuntada fudud ee saloolka iyo soodhada ah waa \$15. Ma bixiyaan ikhtiyaaraadka IMAX, kirooyinka tiyaatarka oo dhan, ama daawashada 3D.

**Hoppers Cinemas**, 200 Warren Avenue, Westbrook, ME 04092 (3.4 Mayl) – Shaneemooyinka Hoppers Cinemas waa tiyaatarka aflaanta cusub ee la aasaasay markay ahayd 1990 ee leh 2 shaashadood. Celcelis ahaan qiimaha bulyeetiga dadka waaweyn waa \$14.50 ee loogu talagalay showga fiidkii oo celcelis ahaan xirmada cuntada fudud ee saloolka iyo soodhada ah waa \$18. Ma bixiyaan ikhtiyaaraadka IMAX ama daawashada 3D.

**Movie Magic**, 1980 Congress Street, Portland, ME 04102 (5.6 Miles) – Movie Magic waa tiyaatarka aflaanta cusub ee la aasaasay markay ahayd 1998 ee leh 8 shaashadood. Celcelis ahaan qiimaha bulyeetiga dadka waaweyn waa \$10.50 ee loogu talagalay showga fiidkii oo celcelis ahaan xirmada cuntada fudud ee saloolka iyo soodhada ah waa \$15.

Shirkadda Pete's Seats waxay noqon doontaa tiyaatarka filimaanta ku celiska ah ee leh waqtiga macquul ah ee gaari wadis ee loogu talagalay qoysaska ku nool suuqa Greater Portland. Shirkadda Pete's Seats waxay soo bandhigi doontaa qiime macquul ah iyadoo la hubinayo mahadhada tayada filimaanta iyo qiimaha macquulka ah. Shirkadda Pete's Seats waxay diiradda saari doontaa mahadhada macaamiisha, dooranaya kuraasta ugu raaxada badan, shaashadaha iyo samaacadaha ugu fiican, iyo cuntooyinka fudud ee tayada ugu sarreeya leh. Intaas waxaa dheer, Shirkadda Pete's Seats waxay noqon doontaa mid caan ka ah bulshada dhexdeeda, oo kirayso tiyaatarka oo dhan ee loogu talagalay munaasabada bulsheed, habeennada ciyaaraha, iyo xulashooyin waxbarasho/farshaxan kuwaasoo si fudud heli karo oo la awoodi karo marka lala barbardhigo loollanka.

Bogga 7

Hadduu loollan badan ka jiro agagaarka aaggaga, beddelkii aad wada qori lahayd dhammaantood, waxaad si fudud u samayn kartaa bayaan furfurasho ah oo aad ku aqoonsanayso loollanka oo aad ugu sheegayso akhristaha inaad u malayso loollameyaasha qoran inay yihiin kuwa kuugu dhow ama ugu fiican.

Waa inaad sheegto magaca iyo goobta loollamahaaga. Waa mid waxtar u leh akhristaha haddii aad sidoo kale ku darto masaafada uu loollame u jiro goobtaada iyo qiimaha si uu akhristuhu faham maskaxeed uga qaato muuqaalka guud ee loollanka. Isku day inaad aqoonsato waxyaabaha uu ku fiican yahay loollamaha. Muxuu u yahay loollame?

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaa waa inaad muujiso muddada ganacsigaagu suuqa ku jiray iyo saamiga suuqa ee aad haysato. Haddii aadan aqoon saamigaaga suuqa, muuji iibkaaga iyo isbeddellada iibka ee sii kordhaya. Haddii ganacsigaagu uusan lahan lahayn buro-dheeri cad, markaa waxaad u baahan doontaa inaad aqoonsato inuu suuqa fursad ka jirto aad ku taageerto ganacsi kale oo la mid ah kan loollanka.

*Tabaha Ganacsiga: Weligaa ha soo bandhigin fikrad aan la taageerin, oo taban oo ku saabsan loollamahaaga. Keliya sheeg xaqiiqooyinka.*



# Xeellada Suuqgeynta

Qeybta Xeelada Suuqgeynta waxaa loo isticmaalaa in lagu aqoonsado oo lagu caddeeyo suuqa bartilmaameedka ah (tus., macmiilka ugu habboon ganacsigaaga) kadibna muuji sida aad u qorsheyneyso inaad u suuqgeyso ganacsigaaga si aad u hesho saami suuqeed. Qeybtan waxa loo kala qaybin karaa saddex qeybood. Qeybta koowaad waxaa loo adeegsadaa in lagu aqoonsado macmiilka habboon. Qeybaha labaad iyo saddexaad waxaa loo adeegsadaa in lagu aqoonsado xeeladahaaga suuqgeynta onlaynka iyo oflaynka ah. Tusaalooyinka xeeladaha oflaynka ah waa calaamadaha ganacsi, buug-yaraha, waxyaabaha la daabaco, kaararka ganacsiga, af ka sheegida, shuraako ganacsi, iwm. Tusaalooyinka xeeladaha onlaynka qaarkood waxaa ka mid ah bogga shirkadda, Facebook, Google, Instagram, iwm.

Iyadoo qof walba laga yaabo inuu arko qiimaha baddeecadaada ama adeeggaaga, ujeeddada qeexitaanka suuqa bartilmaameedka ah waa in la fahmo cidda Dhab ahaantii noqonayso macmiilkaaga. U fikir sidan; 100-ka macaamiil ee suurtoogalka ah, 5-tee ayaa ugu horreysa? Tani waxay kaa caawinaysaa inaad aqoonsato macaamiishaada AASAASIGA. Ganacsigaagu wuxuu rabi doonaa inuu diirada saaro macaamiisha aasaasiga ah marka hore. Marka aad yeelanayso macaamiil oo aad helayso lacago dheeraad ah, markaa waxaad ballaarin kartaa suuqgeyntaada. Balse iyadoo miisaaniyada suuqgeyntaadu xadidan tahay, waa inaad hubiso in lacag kasta si wax-ku-ool ah loo adeegsado – tani waxay la macno tahay si gaar ah u geexo dadaaladaada suuqgeyn.

## Xeeladaha Suuqgeynta

### **Suuqa Bartilmaameedka ah:**

Warbixin 2015 ah oo ku saabsan "Macaamiisha Tiyaatarka Filimka Run Labaad" ayaa shaaca ka qaaday in suuqgeynta Kuraasta Pete ay tahay inay diiradda saaraan laba qaybood oo macaamiisha ah:

- 1) Qoysaska dakhliga hoose iyo dhexe (qoysaska ka badan 2 qof)
- 2) Dakhliga hoose ilaa dhexe ee 18-40 sano jirrada

Falanqaynta dheeraadka ah ee horxogta Tirakoobka Mareykanka ee 2010 ayaa muujinaysa 114,957 qoys iyo dad dhexfurka da'doodu tahay 40.2 sano ay 15 mayl oo gacan u jiraan Shirkadda Pete's Seats. Warbixinta Xafiiska Dalxiiska ee Maine ayaa lagu ogaaday in celceliska da'da ee boodqeyda ee aagga Greater Portland ay ahayd 47 iyadoo 25% ay ku jawaabeen inay raadinayaan xulashooyinka madadaalada ee habbeenkii.

### **Xeelada Oflaynka:**

Shirkadda Pete's Seats ayaa qorsheynaya inay lahaato calaamad weyn, oo iftiin leh oo ku taala iridda tiyaatarka iyo calaamad kale oo weyn, oo iftiin leh oo ku taala waddada dhinaceeda.

Shirkadda Pete's Seats waxay rabi doontaa inay la shaqeyso makhaayadaha maxalliga ah si ay u bixiyaan bulyeetiyaada "Cashada iyo Filimka". Waqtiyada la xusho ee sanadka qaarkood, Shirkadda Pete's Seats ayaa ku wadaagi doonta xayaysiino raadiye boorsamiindooyinkaan. Shirkadda Pete's Seats waxay gaari doontaa goobaha madadaalada ee caanka ah si ay u suuqgeeyaan helitaanka tiyaatarka si loogu kireysto "Habbeenaada Ciyaaraha Fiidiyowga".

Shirkadda Pete's Seats waxay si weyn wax ugu xayeysiin doontaa kuwa jaraa'idada yaryar, ee deegaanka.

### **Xeelada Onlaynka:**

Shirkadda Pete's Seats waxay yeelan doontaa mareeg si wanaagsan loo qaabeeyay oo ay boodqeydaashu ka iibsadaan karaan bulyeetiyaada oo ay kuraas gaar ah uga keydsan karaan onlaynka.

Shirkadda Pete's Seats waxay mareegteeda ku xiriiirin doontaa akoonka Google Business iyo Facebook si loo kordhiyo natiijooyinka Mashiinta Raadinta. Shirkadda Pete's Seats waxay ka sameyn doontaa xayeysiino bartilmaameed leh Facebook iyo Google Ads iyadoo ku salaynayso suuqa bartilmaameedka u ah ee la qeexay.

Bogga 8

Waa muhiim in si cad loo aqoonsado macaamiisha bartilmaameedka ah si ay kaaga caawiyaan inaad si dheeraad ah u baarto xogtan. Ganacsiyada qaarkood waxay u arkaan inay faa'iido u leedahay inay si dhab ah u fahmaan macaamiisha bartilmaameedka ah oo ay qiyaasaan sooca suuqgeynta ee macaamiishaas bartilmaameedka ah laga yaabo inay u baylah noqdaan maalin kasta.

Sifooyinka macaamiisha caadiga ah lagu aqoonsado waa da'da, jinsiga, goobta, heerka dakhliga, waxbarashada, iyo heerka bulsheed.

Dunida maanta jirta (haddii aad tahay ganacsi keliya onlayn ah mooyaane), waa inaad tixgeliso suuqgeyn labada furin ah, suuqgeynta oflaynka iyo suuqgenta onlaynka ah.

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaas waxaad rabi doontaa inaad sharraxdo sida aad hadda wax u suuqgeyso iyo haddii ay shaqaynayso. Ma qorsheyneysaa inaad wax u sameyso si duwan?

Haddii macaamiishaadu ay yihiin ganacsiyo iyo shakhsiyaad, markaa waxaad weli aqoonsan kartaa cidda ay tahay bartilmaameedkaaga ugu fiican adigoo eegaya arrimaha macmiilka sida: nooca warshadaha, goobta, xajmiga shirkadda, tiknoolajiyada, isdhexgalinta, doorbidaadaha qiimaha, tayada, iwm.

*Tabaha Ganacsiga: Waa inaad samaysaa qaab aad ku qori karto sida macaamiisha ganacsigaaga u ogaan karaan. Tani waxay noqon kartaa mid u fudud sida bilaabida barashada macmiil kasta aadoo weydiinaya, "Sidee ayaad nagu maqashay?" ama qaab kale oo lagu helo macluumaadka. Macluumaadkan wuxuu kuu ogolaanayaa inaad si buuxda u fahamto suuqgeynta shaqaynayso iyo mida aan shaqaynayn.*

# Maamulka

Qeybta Maamulka waa in lagu muujiyaa awoodda aad u leedahay inaad sameyso laba shay: 1) inaad samayn karto ganacsiga noocaan ah iyo 2) inaad guud ahaan maamuli karto oo ganacsi samayn karto. Qeybtan waa in lagu daraa mulkiilayaasha ganacsiga.

Qeybta Maamulka waa in lagu caddeeyaa cidda maamuli doonta ganacsiga iyo waxa ay noqon doonto doorarka iyo mas'uuliyadaha ay ku leeyihiin ganacsiga.

Inta badan waxaa loogu yeeraa kooxda **BAIL**; kuwaan waa xirfadleyaasha ugu caansan ee ganacsigu u baahan doono inuu caawimaad ka helo:

**B** – anking (Bangiyeynta)  
**A** – ccounting (Xisaabaadka)  
**I** – nsurance (Canshuurta)  
**L** – egal (Sharciiga)

Marka lagu daro liiska xirfadleyaashan waxay u oggolaanaysaa akhristaha inuu ogaado inaad fahamtay inaad ugu baahan tahay caawimaad khabiir qaybo ka mid ah ganacsigaaga. Tani waxay gacan ka geysanaysaa inaad muujiso in aad awooddo inaad raadsato caawimaad iyo taageero marka loo baahdo.

## Maamulka

Peter Movielover ayaa noqon doona mulkiilaha gaarka ah iyo maamulaha shirkadda Pete's Seats. Peter wuxuu ku lug lahaa soo saarista filimaanta wax ka badan 19 sano. Markay ahayd 1998-kii, Peter waxa lagu daray geedi-socodka qorshaha naqshadaynta iyo dhisidda shineemada Dreams Cinemas ee ku yaala Orono Maine. Tani waxay lahayd cabbir la mid ah 3-da shaashad, ee tiyaatarka aflaanta ku celiska ah. Waxaa intaas dheer, Peter wuxuu awoodday inuu u caawiyo shaqaale ahaan markii shineemada Dreams Cinemas la furay sanadkii 1999, isagoo bartay dhammaan hawlaha socodsiinta tiyaatarka. Peter wuxuu uga shaqeeyay adeege ahaan, gudaha waabka cuntoyinka fudud, isagoo gacan ka geysanaya maareynta filimaanta, saadka jadwalka shaqaalaha, iyo suuqgeynta. Peter wuxuu sidoo kale bartay doorarka iyo jadwalka alaab-qeybiyayaasha iyo iibiyayaasha ee ganacsiga, sida loo isticmaalo qalabka filimanta, iyo agabyada muhiimka ah ee shatiyeynta filimaanta. Khibradan waxay ka tarjumi doontaa doorarka uu u baahan doono si uu uga shaqeeyo ganacsiga.

Labadii sano ee la soo dhaafay, Peter wuxuu si buuxda u dhiganayay Jaamacadda Maine ee ku taala Orono si uu u kasbado Shahaadada Heerka Labaad ee Maamulka Ganacsiga. Tani waxay u oggolaatay inuu si fiican u fahmo dhaqaalaha, canshuurta, iyo dhibaatooyinka sharciyeed ee ganacsigu leeyahay.

Talo-siiyaha Peter, Rick Second, waa mulkiilaha iyo maamulaha shineemada Dreams Cinemas eeku taala Orono, Maine. Saaxiib muddo dheer ah ahaan, Rick waxaa ka go'an inuu Peter siiyo talo iyo caawimaad xagga saadka ah ee furitaanka iyo socodsiinta tiyaatarka aflaanta ku celiska ah. Rick wuxuu si guul leh u maamulayay shineemada Dreams Cinemas ilaa 21 sano.

Peter Movielover ayaa raadsan doona adeegyada xirfadleyaashan soo socda:

Bangiile – Elizabeth Benjamin, Imaginary Savings Bank  
 Xisaabiye/Xisaab-haye – Alexandra Numbers, Alex's Books  
 Insurance Agent – Nick Covered, Movie'sRUS Insurance Company  
 Legal – La go'aamin doono kahor xiritaanka

Peter sidoo kale wuxuu la kulmay la-taliyayaal ka socda:

- The Maine Small Business Development Center
- Qaybta SCORE, Portland

Bogga 9

Farqadda koowaad waa inay gudbisaa khibrad kasta oo aad u leedahay ganacsiga. Haddii aadan khibrad u lahayn ganacsiga, markaa waxaad muujin doontaa waxa dhinacyada taariikh aqooneed ee ka dhigi kara inaad ku guulaysato socodsiinta ganacsiga noocan ah.

Xusuusnow inaad ku darto waxbarasho kasta oo ku habboon oo aad leedahay.

Qorista inay ku caawin doonaan talo-bixiyayaal aqoon u leh ganacsigan ama ka helista adeegyo la-taliyayaal ganacsi sida **Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine** ama **SCORE** (labaduba bilaash ah) ayaa dahlin doona kalsoonida lagu qabo qorshahaaga ganacsi

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaa waa inaad muujiso muddada aad si guul leh u socodsiinayso ganacsigaaga. Culeys saar hawlaha shaqo ee aad qabanaysay oo muuji guulo kasta oo gaar ah oo aad u nisbayn karto shaqadaada. Tusaale ahaan, miyuu iibka ganacsigaagu kobcay? Ma gashay suuq cusub? Miyaad samaysay oo soo biirisay baddeeco ama adeeg cusub?

*Tabaha Ganacsiga: Si fudud ha ugu celcelin waxa ku jira taariikh hawleedkaaga ( taariikh hawleedkaaga waa in lagu daraa gudaha lifaaqa). Taas beddelkeeda, qeybtan waa in loo adeegsadaa in lagu muujiyo oo tafaasiil dheeraad ah laga bixiyo qaybaha tariikh hawleedkaaga ee aad u maleyso inay khuseeyaan hawlgallada guusha leh ee ganacsigan.*

# Xaaladda Maaliyadeed: Isha & Isticmaalka Lacagaha

Qeybta Isha & Isticmaalka Lacagaha waa dukumeenti hal bog ka kooban oo degdeg ah kaasoo kaa caawinaya in la ogaado halka aad ka hesho maalgelinta iyo sida ama waxa aad qorshaynayso inaad u isticmaasho lacagaha. Qeybta isticmaalka ee ku jirta qaybtan waxaa sidoo kale loo malayn karaa inay tahay “Lacagaha Lagu Bilaabo Ganacsiga ee Loo Baahan Yahay”. Ganacsiyada oo dhan waa in ay qiimeeyaan inay u baahan doonaan Raasumaalka Hawl-socodsinta. Raasumaalka hawl-socodsinta waa lacagta loo baahan yahay in lagu bixiyo hawlaha maalinlaha ah ilaa ganacsigaagu ka helayo dakhli ku filan oo uu ku bixiyo biilasha u gaarka ah. Tani waxaa inta badan lagu go'aamiyaa qeybta Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha.

Bangigu wuxuu eegi doonaa qaybta isticmaalka wuxuuna isku dayi doonaa inuu go'aamiyo inta ay le'eg tahay “Rahanta” aad ku qortay soojeedinta. Rahantu waa hanti kasta oo bangigu qaadanayo haddii aadan dib u bixin karin amaahda.

Bangiga ayaa inta badan sicir-dhimi doona qiimaha Rahanta ee asalka ah.

Shuruudaha amaahda waxay inta badan ku xiran yihiin qiimaha Rahanta iyo rajada nololeed, tusaale ahaan:

Deymaha muddada gaaban (inta badan ka yar halka sano) – sida caadiga ah loogu talagalay raasumaal hawl-socodsiin ahaan

Deymaha muddada dhexe (inta badanh 1-10 sano) – sida caadiga ah loogu talagalay qalabka fudud (baabuurta, iwm), iibsashada ganacsi, alaab, iwm.

Deymaha muddada dheer (inta badan 10+ sano) – sida caadiga ah hantida maguurtada ah, doomaha ganacsi, iyo qalabka culus

**Maaliyadda: Isha & Isticmaalka**

Pete's Seats  
Source and Use Statement

Source:

	Amount	Mix
Owner (Cash)	\$ 130,600	20%
Bank (Loan)	\$ 522,400	80%
<b>Total Sources:</b>	<b>\$ 653,000</b>	

Use:

1 Purchase Land & Building	\$ 300,000	46%
2 Renovate Building/Improvements	\$ 200,000	31%
3 Equipment and Furniture	\$ 120,000	18%
4 Working Capital	\$ 33,000	5%
<b>Total Uses:</b>	<b>\$ 653,000</b>	

Notes:

- 1 Land value of \$90,000 and Building Value of \$210,000 per Town Assessment (appraisal needed)
- 2 Based on Contractor Estimates, which can be found in the Appendix
- 3 Based on Vendor Estimates, which can be found in the Appendix
- 4 Working Capital amount is based on need shown in first year cash flow projections

Bogga 10

Qaddarta lacageed ee aad qorsheyneyso inaad shakhsi ahaan ku maalgashato heshiiska ayaa loo yaqaanaa “Raasumaal”. Marka lafo badan aad gelin karto heshiiska, ayuu bangigu u siin doonaa mudnaan soojeedintaada. Sida caadiga ah, bangigu wuxuu jecel yahay inuu arko 20% lacagta lafaha ah. Uma badna inuu bangigu maalgelin doona 100% soojeedintaada.

Waa inaad hubisaa in qaddarta lacageed ee aad waydiisanayso (Isha) ay la mid tahay lacagta aad qorshaynayso inaad isticmaasho.

Had iyo jeer ku dadaal inaad sharraxdo sida aad ula timid xisaabaadkaaga. Waa inuu akhristuhu si ku filan u fahmo si uu ugu sii jiro bogga uu akhridayo oo aadan u rogin qeybaha kale ee qorshaha ganacsiga si aad u hesho jawaab.

Haddii aad soojeedin maaliyadeed u soo gudbisoo bangiga oo ay kugu wargeliyaan in aysan ku amaahin doonin qaddarta dhan ee aad u baahan tahay, waxaad isku dayi kartaa inaad hesho amaahiyaha daldaloolka maalgelinta (GAP lender). Amaahiyaha daldaloolka maalgelinta waa deyn-bixiye buuxin kara “firaaga” u dhexeeya lacagta aad qorshaynayso inaad shakhsi ahaan u geliso biirtadaada raasumaal ahaan iyo qaddarta lacageed ee bangigu rabo inuu geliyo. Amaahiyeyaasha daldaloolka maalgelinta ee Guud ee jooga Maine waa Maamulka Maaliyadda ee Maine (FAME), Shirkadda Coastal Enterprises Inc. (CEI), ururrada horumarinta dhaqaalaha, Goleyaasha Dawladeed, iyo caasimadaha iyo magaalooyinka waaweyn.

*Tabaha Ganacsiga: Haddii aad horay u gelisay lacag aad u badan ganacsigaaga sannadkii la soo dhaafay, iska hubi inaad ku muujiso lacagtan iyo waxa loo adeegsaday qeybta Isha iyo Isticmaalka. Inta badan ganacsatadu waxay si fudud ugu daraan qaddarta deynta ee ay hadda raadinayaan wayna iska indhatiraan biirtadoodii hore.*

# Xaaladda Maaliyadeed: Qoraal Xisaabeedka Dakhliga

Bayaanka Dakhliga (inta badan loo yaqaano Qoraal Xisaabeedka Faa'iidada iyo Khasaaraha) waa qoraal xisaabeed maaliyadeed oo muujinaya Dakhliga (Dakhliyada) iyo Kharashaadka ganacsiga muddo cayiman (inta badan sanad). Bangigu wuxuu rabi doonaa inuu arko warbixinta dakhliga sanadka ugu horreeya oo loo kala dhigdhigay bil-bil kadibna laba sano oo dheeraad ah oo la muujinaya qaddarta sanadlaha ah (kuwaasoo inta badan loo "saadaashaada") Si aad si sax ah ugu qorto bayaankan, marka hore waa inaad fahamtaa midka ay tahay inaad adeegsato labada hab ee loo qoro dakhliga iyo kharashaadka ganacsiga:

- Habka Lacagta (Inta Badan La Adeegsado) –isweydaarsiyada maaliyadeed (iibka & kharashaadka) ayaa la aqoonsadaa keliya marka lacag la isdhaafsado.
- Habka Lacagta La Qaban – isweydaarsiyada maaliyadeed waxaa la aqoonsadaa markuu kharash baxo, haddii lacag la isdhaafsaday ama haddii kaleba.

Adoo isticmaalaya mid ka mid ah hababka kor ku xusan, ku bilow xisaabaadka iibka ganacsiga. Ganacsiyada leh baddeecooyinka, iibka ayaa inta badan ku jiri doona kelmada "Kharashaadka Alaabta La libiyay" (COGS). Kelmadan waxay ka dhigan tahay kharashaadka alaabta ama maaddooyinka ee loo baahan yahay si loo sameeyo baddeecada. Qaybta dakhliga ayaa markaa waxaa ku xiga Kharashyaadka Hawl-socodsiinta.

Maaliyadda: Qoraal Xisaabeedka Dakhliga													
Pete's Seats													
Projected First Year Income Statement	Startup	Opening	Stabilized										Total
	Month 1	Month 2	Month 3	Month 4	Month 5	Month 6	Month 7	Month 8	Month 9	Month 10	Month 11	Month 12	
1 Ticket Sales													
Average Charge per Ticket	\$ 5.00												
# Of Tickets Sold	-	3,000	3,200	3,500	4,000	4,500	4,750	5,200	5,600	5,600	5,600	5,600	50,550
Profit	\$ -	\$ 15,000	\$ 16,000	\$ 17,500	\$ 20,000	\$ 22,500	\$ 23,750	\$ 26,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 252,750
1 Concessions													
Average Sale Per Customer	\$ 14.00												
# Of Customers	-	375	400	437	500	562	593	650	700	700	700	700	6,317
Gross Sales	-	\$ 5,250	\$ 5,600	\$ 6,118	\$ 7,000	\$ 7,868	\$ 8,302	\$ 9,100	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 88,438
2 Cost of Good Sold - Food/Material	15%	\$ -	\$ (788)	\$ (840)	\$ (918)	\$ (1,050)	\$ (1,180)	\$ (1,245)	\$ (1,365)	\$ (1,470)	\$ (1,470)	\$ (1,470)	\$ (13,266)
Profit	\$ -	\$ 4,463	\$ 4,760	\$ 5,200	\$ 5,950	\$ 6,688	\$ 7,057	\$ 7,735	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 75,172
Summary													
Total Gross Sales	\$ -	\$ 20,250	\$ 21,600	\$ 23,618	\$ 27,000	\$ 30,368	\$ 32,052	\$ 35,100	\$ 37,800	\$ 37,800	\$ 37,800	\$ 37,800	\$ 341,188
Total COGS	\$ -	\$ (788)	\$ (840)	\$ (918)	\$ (1,050)	\$ (1,180)	\$ (1,245)	\$ (1,365)	\$ (1,470)	\$ (1,470)	\$ (1,470)	\$ (1,470)	\$ (13,266)
Total Gross Profit	\$ -	\$ 19,463	\$ 20,760	\$ 22,700	\$ 25,950	\$ 29,188	\$ 30,807	\$ 33,735	\$ 36,330	\$ 36,330	\$ 36,330	\$ 36,330	\$ 327,922
Operating Expenses													
Wages (Your Employees)	\$ 2,040	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 99,280
Payroll taxes and fees	\$ 336	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 15,252
3 Movie Distributor Fees	\$ -	\$ 5,250	\$ 5,600	\$ 6,125	\$ 7,000	\$ 7,875	\$ 8,313	\$ 9,100	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 88,463
Advertising/Marketing/Website	\$ 5,000	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 250	\$ 7,000
Prop & Liab Insurance	\$ 4,500	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 7,360
Utilities	\$ 575	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 9,375
Property Taxes	\$ 4,150	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 4,150	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 8,300
Office Expense	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 2,400
Software	\$ 2,500	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 12,400
Supplies	\$ 1,500	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 8,100
4 Interest from Loan		\$ 2,503	\$ 2,494	\$ 2,486	\$ 2,477	\$ 2,468	\$ 2,459	\$ 2,450	\$ 2,441	\$ 2,432	\$ 2,423	\$ 2,413	\$ 27,044
5 Depreciation		\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 1,474	\$ 16,218
6 Credit card fees	\$ -	\$ 547	\$ 583	\$ 638	\$ 729	\$ 820	\$ 865	\$ 948	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 9,212
Other (Misc)	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 1,800
Total Expenses	\$ 20,951	\$ 23,130	\$ 23,508	\$ 24,079	\$ 25,036	\$ 30,143	\$ 26,317	\$ 27,178	\$ 27,942	\$ 27,933	\$ 27,923	\$ 28,064	\$ 312,204
7 Pre-tax, Net Profit from Operations	\$ (20,951)	\$ (3,668)	\$ (2,748)	\$ (1,378)	\$ 914	\$ (955)	\$ 4,490	\$ 6,557	\$ 8,388	\$ 8,397	\$ 8,407	\$ 8,266	\$ 15,719
Assumptions													
1	Sales of Tickets are based on 12.5% theater capacity (900 seats) with Concessions based on 1 out of 8 sales, see appendix. Revenue for whole theater rentals was not substantial and excluded												
2	Cost of goods is estimated at 15% based on Pricing from Supplier in Boston, see appendix												
3	Movie Distributor Fees are \$250 or 35% of sales, whichever is higher												
4	Interest Based on a Bank loan of \$522,400 at 5.75% Interest Rate over 15 Years												
5	Depreciation is being estimated, see depreciation schedule in appendix for details												
6	Credit Card Fees based on 3% fee with an assumption that 90% of customers will pay via credit card												
7	Working Capital needs are based on negative cash flow projections in the first few months of operation, see first year cash flow												

Bogga 11

Faa'iidada saafida ah waxaa la xisaabiya bil kasta. Waa wax caadi ah in billaha ugu horreeya ganacsigu khasaaro (tus., kharashaadka ganacsigu ku shaqaynayo ka bataan dakhliga ganacsigu soo saaro).

*Tabaha Ganacsiga: Fiiro gaar ah u yeelo waxa malahaagu ahaa markaad la timid faa'iidadaada iyo khasaarahaaga tirooyinkooda. Akhristuhu wuxuu ku weydiin doonaa inaad sharraxdo oo aad u hesho jawaab macquul ah.*



# Xaaladda Maaliyadeed: Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha

Qeybta Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha waxay ku tusinaysaa sida dhabta ah ee lacagta caddaanka ah ay u soo gasho ama uga baxdo ganacsiga. Qoraal xisaabeedkan wuxuu kaabayaa Qoraal Xisaabeedka Dakhliga waxaana loo qori karaa qaabab badan. Tusaalaha Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha ee hoos lagu isticmaalay ayaa marka hore ku bilaabmaya qulqulka lacagta SOO GASHO ganacsiga (hoos loogu muujiyay Xarooto ahaan) kadibna qoraya qulqulka lacagta caddaanka ah ee KA BAXDO ganacsiga (hoos loogu muujiyay Baxdo ahaan). Waxaad rabi doontaa inaad ku darto xisaabaadka laga helo qoraal xisaabeedkaaga Isha iyo Isticmaalka ee ku jira qulqulka lacagaha. Qaybta Isha waxaa lagu muujin doonaa qaybta Xaroodo (lacagta soo xarooto) halka qaybta Isticmaalka lagu muujin doono qaybta Baxdo (lacagta baxdo). Si la mid ah Qoraal Xisaabeedka Dakhliga, bangigu yaa rabi doonaa inaad saadaaliso sanadka ugu horreeya (bil-bil loo kala dhigdhigay) iyo laba sano oo kale ilaa muddo dhan sadex sano.

<b>Maaliyadda: Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha</b>													
<b>Pete's Seats</b>													
Projected First Year Cash Flow Statement	Startup Month 1	Opening Month 2	Month 3	Month 4	Month 5	Month 6	Month 7	Month 8	Stabilized Month 9	Month 10	Month 11	Month 12	Total
<b>Cash Receipts</b>													
Ticket Sales Revenue	\$ -	\$ 15,000	\$ 16,000	\$ 17,500	\$ 20,000	\$ 22,500	\$ 23,750	\$ 26,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 28,000	\$ 252,750
Concessions Revenue (Net)	\$ -	\$ 4,463	\$ 4,760	\$ 5,200	\$ 5,950	\$ 6,688	\$ 7,057	\$ 7,735	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 8,330	\$ 75,172
Loan Proceeds	\$ 522,400												\$ 522,400
Owner Cash	\$ 130,600												\$ 130,600
<b>Total Cash Receipts</b>	<b>\$ 653,000</b>	<b>\$ 19,463</b>	<b>\$ 20,760</b>	<b>\$ 22,700</b>	<b>\$ 25,950</b>	<b>\$ 29,188</b>	<b>\$ 30,807</b>	<b>\$ 33,735</b>	<b>\$ 36,330</b>	<b>\$ 36,330</b>	<b>\$ 36,330</b>	<b>\$ 36,330</b>	<b>\$ 980,922</b>
<b>Cash Disbursements</b>													
Purchase of Building	\$ 300,000												\$ 300,000
Renovation of Building	\$ 200,000												\$ 200,000
Equipment and Furniture	\$ 120,000												\$ 120,000
Working Capital	\$ 33,000												\$ 33,000
Wages (Your Employees)	\$ 2,040	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 8,840	\$ 99,280
Payroll taxes and fees	\$ 336	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 1,356	\$ 15,252
Movie Distributor Fees	\$ -	\$ 5,250	\$ 5,600	\$ 6,125	\$ 7,000	\$ 7,875	\$ 8,313	\$ 9,100	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 9,800	\$ 88,463
Advertising/Marketing/Website	\$ 5,000	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 250	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 100	\$ 250	\$ 7,000
Prop & Liab Insurance	\$ 4,500	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 260	\$ 7,360
Utilities	\$ 575	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 800	\$ 9,375
Property Taxes	\$ 4,150	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 4,150	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ -	\$ 8,300
Office Expense	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 200	\$ 2,400
Software	\$ 2,500	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 900	\$ 12,400
Supplies	\$ 1,500	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 600	\$ 8,100
Loan Payments (Principal & Interest)	\$ -	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 4,338	\$ 47,719
Credit card fees	\$ -	\$ 547	\$ 583	\$ 638	\$ 729	\$ 820	\$ 865	\$ 948	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 1,021	\$ 9,212
Other (Misc)	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 150	\$ 1,800
<b>Total Cash Disbursements</b>	<b>\$ 673,951</b>	<b>\$ 23,491</b>	<b>\$ 23,877</b>	<b>\$ 24,457</b>	<b>\$ 25,423</b>	<b>\$ 30,539</b>	<b>\$ 26,722</b>	<b>\$ 27,592</b>	<b>\$ 28,365</b>	<b>\$ 28,365</b>	<b>\$ 28,365</b>	<b>\$ 28,515</b>	<b>\$ 969,660</b>
<b>Net Cash Flow</b>	<b>\$ (20,951)</b>	<b>\$ (4,028)</b>	<b>\$ (3,117)</b>	<b>\$ (1,756)</b>	<b>\$ 527</b>	<b>\$ (1,351)</b>	<b>\$ 4,085</b>	<b>\$ 6,143</b>	<b>\$ 7,965</b>	<b>\$ 7,965</b>	<b>\$ 7,965</b>	<b>\$ 7,815</b>	<b>\$ 11,262</b>
<b>Cumulative Cash Flow from Operations</b>	<b>\$ (20,951)</b>	<b>\$ (24,979)</b>	<b>\$ (28,097)</b>	<b>\$ (29,853)</b>	<b>\$ (29,326)</b>	<b>\$ (30,677)</b>	<b>\$ (26,593)</b>	<b>\$ (20,449)</b>	<b>\$ (12,484)</b>	<b>\$ (4,519)</b>	<b>\$ 3,447</b>	<b>\$ 11,262</b>	
<b>Cash On Hand (Working Capital)</b>	<b>\$ 33,000</b>												
<b>Opening Balance</b>	<b>\$ 33,000</b>	<b>\$ 12,049</b>	<b>\$ 8,021</b>	<b>\$ 4,903</b>	<b>\$ 3,147</b>	<b>\$ 3,674</b>	<b>\$ 2,323</b>	<b>\$ 6,407</b>	<b>\$ 12,551</b>	<b>\$ 20,516</b>	<b>\$ 28,481</b>	<b>\$ 36,447</b>	
plus Cash Receipts	\$ 653,000	\$ 19,463	\$ 20,760	\$ 22,700	\$ 25,950	\$ 29,188	\$ 30,807	\$ 33,735	\$ 36,330	\$ 36,330	\$ 36,330	\$ 36,330	
less Cash Disbursements	\$ 673,951	\$ 23,491	\$ 23,877	\$ 24,457	\$ 25,423	\$ 30,539	\$ 26,722	\$ 27,592	\$ 28,365	\$ 28,365	\$ 28,365	\$ 28,515	
<b>Ending Cash Balance</b>	<b>\$ 12,049</b>	<b>\$ 8,021</b>	<b>\$ 4,903</b>	<b>\$ 3,147</b>	<b>\$ 3,674</b>	<b>\$ 2,323</b>	<b>\$ 6,407</b>	<b>\$ 12,551</b>	<b>\$ 20,516</b>	<b>\$ 28,481</b>	<b>\$ 36,447</b>	<b>\$ 44,262</b>	
<b>Note</b>	<b>Working Capital At Loan Close = \$33,000</b>												

Bogga

Qaybta hoose ee Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha waxaa ku jira qayb muujinaysa lacagta “Dheelitirka Haraaga Hore” iyo “Dheelitirka Haraaga Dambe” ah. Qaybahan waxay muujinayaan dheelitirka haraaga hore iyo dambe labaduba, siday u kala horreeyaan, ee loogu talagalay bisha ku taala koontadaada bangiga. Dheelitirka Haraaga Dambe ee taban wuxuu ka dhigan yahay inaysan lacag kugu filan ku jirin koontadaada bangiga si aad u bixiso kharashaadka la filayo oo dhan ee ganacsigaaga ku talagalay bishaas. Waa inaad MARNABA soo gudbin qorshe ganacsi oo muujinaya Dheelitirka Haraaga Dambe oo taban. Waa muhiim inaad fahamto inta uu le'eg yahay Raasumaalka Hawl-socodsiinta ee aad u baahan doonto si aad u hubiso inaad bixin karto biilasha lagaa filayo oo dhan.

*Tabaha Ganacsiga: Si aad u go'aamiso haddii aad u baahan tahay iyo inta uu le'eg yahay Raasumaalka Hawl-socodsiinta aad u baahan tahay, eeg “Dheelitirka Haraaga Dambe”. Haddii ay jiraan bilooyin Dheelitirka Haraaga Dambe xun yahay, ganacsigaagu wuxuu u baahan doonaa Raasumaalka Hawl-socodsiinta. Aqoonso bisha uu Dheelitirka Haraaga Dambe ugu xun yahay, qaddartan waa Raasumaalka Hawl-socodsiinta ee aad u baahan tahay.*

# Xaaladda Maaliyadeed: Dheelitirka Xisaabaha

Qeybta Warqadda Dheelitirka Xisaabaadka ayaa ka bixinaysa sawir muddada uu jirayo ganacsigaaga. Waxaa ku qoran hantida iyo deymaha ganacsigaaga ee maalintaas. Baangigu wuxuu inta badan codsadaa warqadda dheelitirka xisaabaadka oo muujinaysa aragtida ganacsiga ee maalinta deymaha la bixin doono iyo maalinta u dambeysa sanad canshuureed kasta ee saddexda sano. Warqadda dheelitirka xisaabaadka had iyo jeer waxay u sii kala dhigtaa xisaabaadka: Hantida = Deymaha iyo Hantida Saafida ah. Hantida ku qoran arqadda dheelitirka xisaabaadka waa waxa ganacsigu leeyahay halka deymaha ay yihiin inta shirkadda lagu leeyahay. Raasumaalka Saafida ah waxaa la go'aamiyaa iyadoo la kala jarayo Hantida iyo Deymaha ganacsigaaga. Raasumaalka Saafida ah waxaa sidoo kale loo yaqaanaa “hantida guud” ee ganacsigaaga.

Hantida iyo Mas'uuliyadaha ku qoran warqadda dheelitirka xisaabaadka waxaa loo kala dhigdhigaa Muddo Gaaban iyo Muddo dheer. Muddada Gaaban waxaa loola jeedaa wax kasta oo la isticmaali doono sannad gudihiisa halka Muddada Dheer ay ka dhigan tahay hanti kasta ama mas'uuliyad kasta oo muddo waxtar leh ama muddo ka badan 1 sano.

Hanti-oofsiga ku taala Warqadda Dheelitirka Xisaabaadka waxay muujinaysaa in qiimaha (ama inta waxtarku leedahay) hantida hoos u dhaci doonto muddo kadib. Dhulku marnaba laguma sameyso hanti-oofsi.

Raasumaalka saafida ah wuxuu ka turjumayaa wax kasta oo qiimo leh oo laga helo hawlaha ganacsiga (dakhliga ama khasaaraha) iyo maalgashi kasta oo la geliyo ama laga saaro shirkadda.

<b>Maaliyadda: Warqadda Dheelitirka Xisaabaadka</b>		
<b>Pete's Seats</b>		
First Year Balance Sheet	On the Day of Closing	Common Sized
<b>Assets</b>		
<i>Current Assets</i>		
Cash (Working Capital)	\$ 33,000	
Other Current Assets & Prepaids	\$ -	
Total Current Assets	\$ 33,000	5%
<i>Long Term Assets</i>		
Land	\$ 90,000	
Building & Improvements	\$ 410,000	
Equipment and Furniture	\$ 120,000	
Less accumulated Depreciation	\$ -	
Total Long Term Assets	\$ 620,000	95%
Total Assets	\$ 653,000	100%
<b>Liabilities</b>		
<i>Current Liabilities</i>		
Current Portion of Long Term Debt	\$ 22,608	
Total Current Liabilities	\$ 22,608	3%
<i>Long Term Liabilities</i>		
Long Term Debt	\$ 499,792	
Total Long Term Liabilities	\$ 499,792	77%
<b>Equity</b>		
Owners Draw	\$ -	
Members Capital	\$ 130,600	
Pre-Tax Profit (Retained Earnings)	\$ -	
Total Equity	\$ 130,600	20%
Total Liabilities & Equity	\$ 653,000	100%

Si cad u calaamadee muddada waqtiga ee qoraal xisaabeedku daboolayo

Mararka qaarkood waxaa waxtar leh in loo qoro xisaabaadka “si guud oo isleh”, taasoo ka dhigan inaad ka u muujiso tirada boqolley ahaan. Tani waxay kuu oggolaaneysaa inaad si fudud u aragto oo isku barbardhigto xisaabaadka la kala dhigdhigay.

Xusuusnow isla'egta sare: Hantida = Deymaha iyo Hantida Saafida ah. Labadaan xisaabaad had iyo jeer waa inay isku dheelitirmaan...mar walba.

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaa waxaad u baahan doontaa inaad ku darto ilaa saddex sano oo waraaqadaha dheelitirka xisaabaadka ah ee hore ee loogu talagalay bangiga. Ganacsiyada cusub waxay u muuqdaan kuwo leh deymo sarreeyo maadaama ay qaataan deyn si ay bilowdaan, halka ganacsiyada jira ay u muuqdaan inay leeyihiin dheelitirnaan badan. Tani waxaa ugu wacan in ganacsiga jira waqti ku qaatay inuu bixiyo deymaha, uruuriyo hanti, ama dakhli ka soo saaro hawlaha ganacsiga.

*Tabaha Ganacsiga: Waxaa suurto gal ah inaad raasumaalka saafida ah noqdo mid taban marka aad bilowdo ganacsigaaga. Tani waa run gaar ahaan haddii aad wax kireyso oo aadan haysan wax hanti ah (sida iibinta dhismaha) si aad u bixiso deymaha. Tani ma ahan wax xun.*

# Xaaladda Maaliyadeed: Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha iyo Saami-qeybsiyada

Qeybta Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha iyo Saami-qeybsiyada waxay u oggolaataa mulkiilaha ganacsiga inuu si dhab ah u fahmo tirada baddeecooyinka loo baahan yahay in la iibiyo ama lacagta loo baahan yahay adeegyada in lagu dalaco si loo daboolo kharashaadka socodsiinta ganacsiga.

Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha sida fudud waa waqtiga ganacsigu soo saaray dakhli ku filan si uu u daboolo wadarta kharashaadka sanadlaha ah. Qeybtan ayaa sidoo kale oggolanaysa isbarbardhigga saami-qeybsiga ganacsigaaga iyo Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha. Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha waa erey loo isticmaalo in lagu qeexo celceliska xisaabaadka maaliyadeed ee laga soo qaatay ganacsiyada dhabta ah, ganacsiyada la midka ah ee ku jira warshadahaaga.

Si aad u xisaabsio barta Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha, ku bilow wadarta kharashaadkaaga sanadlaha ah. Waxaad sidoo kale u baahan doontaa inaad fahamto si dakhli loo soo saaro. Haddii aad leedahay ilo dakhli oo badan marka waxaad rabi doontaa inaad fahamto inta uu le'eg yahay dakhliga kaa soo galo il kasta.

Kadib waxaad qaadaysaa inta dakhli ee aad ka soo saarto baddeecada ama adeegga waxaadna u qaybinaysaa wadarta kharashaadka sanadlaha ah.

Dakhli kasta oo ka dambeeya bartan waa faa'iido.

**Maaliyadda: Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha iyo Saami-qeybsiyada**

**Falanqeynta Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha:**

Shirkadda Pete's Seats waxay qiyaasayaa inay soo saarto \$327,922 oo faa'iido guud ah (kadib marka laga jaro 15% iibka Cuntooyinka Fudud (COGS) ee sanadka ugu horreeya. Faa'idada guud, 77% ka mid ah waxaa la helayaa iibka bulyeetiyo filimaanta halka 23% laga helayo iibka cuntooyinka fudud.

Wadarta kharashaadka socodsiinta ee loogu talagalay sannadka ugu horreeya waxay u dhigantaa \$312,204. Haddii aan tani u kala qaadno 77% iyo 23% si aan u muujino boqolleyda iibka bulyeetiyo filimaanta marka lala barbardhigo iibka cuntooyinka fudud, waxaan helaynaa \$240,397 iyo \$71,807 hadba sida ay u kala horreeyaan.

Marka bulyeetiyo filimaantayahay \$5, barta dheelitirka faa'idada & khasaaraha laga helo iibka bulyeetiyo filimaanta ee \$240,397 ayaa la gaari doona kadib markii la iibiyo 48,080 bulyeeti. Marka iibka macmiil kasta ee cuntooyinka fudud yahay \$11.90 (xisaabaadka 15% COGS), barta dheelitirka faa'idada & khasaaraha laga helo iibka cuntooyinka fudud ee \$71,807 ayaa la gaari doona kadib iibka 6,035 bulyeeti.

Dheelitirka Faa'idada & Khasaaraha waa la gaari gudaha Bisha 11.

**Saami-qeybsiyada:**

Iyadoo la adeegsanayo warbixinta *ProfitCents* Report (eeg Lifaaqa) laga helay Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine hoos waxaa diyaar ku ah Saami-qeybsiyada Shirkadda Pete's lala barbardhigay Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha:

	Shirkadda Pete's Seats	Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha
Saami-qeybsiga Jira:	1.46	1.10
Saami-qeybsiyada Dakhliga Lagu Socodsiyo Deynta	1.24	3.62
Faa'idada Saafida ah ee La Filayo	4.6%	4.04%

Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha ayaa la soo uruuriyay iyadoo la adeegsanayo horxogta 2017 ee US-Northeast ee leh koodhka NAICS ee 512131.

Bogga 14

Saami-qeybsiyada ay tahay inaad ku darto warbixinta:

**Saami-qeybsiga Jira:** la xisaabiyo iyadoo la qaadayo Hantida Muddada Gaaban oo loo qaybinayo Deynta Muddada Gaaban. Tani waxaa laga xisaabiyaa Warqadda Dheelitirka Xisaabaadka.

**Saami-qeybsiyada Dakhliga Lagu Socodsiyo Deynta:** la xisaabiyo iyadoo la qaadayo wadarta guud ee faa'idada saafida ah (oo ay ku jiraan wadarta lacagaha deynta) oo loo qeybiyay wadarta lacagaha deynta. Tani waxaa laga xisaabiyaa Qoraal Xisaabeedka Qulqulka Lacagaha.

**Faa'idada Saafida ah:** waxaa ayaa xisaabiyaa iyadoo la qaadanayo wadarta guud ee faa'idada saafida ah oo loo qaybinayo wadarta guud ee dakhliga. Tani waxaa laga xisaabiyaa Qoraal Xisaabeedka Dakhliga.

Xarunta Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine waxay soo saari kartaa warbixinta Celceliska Saamiyada Warshadaha ee loo yaqaano *ProfitCents*. Warbixintan waxaa lagu salayn karaa warshadaada iyo goob juqraafiyeedka.

Waxyaabaha sare keliya waa saami-qeybsiyada ugu yar ee aad rabi lahayd inaad ku xisaabiso qorshaha ganacsigaaga. Saddexdaan saami-qeybsi waxaa si dhow u eegi doona bangiyada. Bangiyo badan ayaa lahaan doona siyaasado dhigaya inaysan aqbalin qorshe ganacsi oo mid ka mid ah saamiyadaan uu aad u hooseeyo. Shuruudda guud waa in Saami-qeybsiga Kharasha Socodsiinta Deynta inuu ahaado mid ka sarreeya 1.25. Saami-qeybsiyada kale caanka ah: Saami-qeybsiga Dakhliga Alaabta, Lacagaha La Filayo, Raasumaalka Hawl-socodsiinta, Deynta & Hantida Guud, iwm. Iyadoo ku xiran yahay warshadaada, saamiyada kala duwan ayaa aad muhiim u ah.

*Tabaha Ganacsiga: Bangigu wuxuu soo bixin doonaa Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha wuxuuna barbardhigi doonaa xisaabaadkaaga. Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha waa keliya qalab ka caawiyo bangiga inuu fahmo waxa laga filayo oo uu arko inay xisaabaadkaaga waafaqsan yihiin waxyaabahaas la filayo. Haddii xisaabaadka ay ka baxsan yihiin Celceliska Saami-qeybsiyada Warshadaha, hubi inaad tan si faahfaahsan ugu sharraxdo qorshaha ganacsiga.*

# Lifaaqa

Qeybta Lifaaqa ee qorshaha waa halka ay tahay inaad ku qorto tafaasiisha dheeraadka ah oo dhan ee kaa caawinaya qorshaha ganacsigaaga. Waa inaad ku dadaashaa inaad qaybta ugu muhiimsan ee qorshaha ganacsiga ka dhigto ilaa 15 bog oo aad si fiican wax u caddayso oo nuxurka ka hasho. Qeybta Lifaaqa ayaa noqon karta mid aad u dheer waxayna sii guda geli kartaa tafaasiisha dheeraadka ah oo aan loo baahnayn in lagu daro qaybta ugu muhiimsan. Tusaale ahaan, qaybta ugu muhiimsan ee qorshaha waa in lagu qoraa wadarta kharashaadka qalabka la soo iibinayo halka Lifaaqa yahay inuu ka koobnaad liiska faahfaahsan ee waxa qalabkaasi yahay.

Qeybta Lifaaqa waa inuu had iyo jeer ka kooban yahay (ugu yaraan) taariikh hawleedka, qoraal maaliyadeedka shakhsiyeed, 3 sano oo canshuur-celin shakhsiyeed ah, iyo ilaa 3 sano oo canshuur-celin ganacsi ah (hadduu ganacsigu jiro).

Qayb ka mid ah ujeeddada Qeybta Lifaaqa waa in la bixiyo caddaynta xisaabaadka ku jira saadaashaada. Macluumaad kasta oo xaqiijin kara kharashaadka, sida ijaarka ama kharashaadka iibka ee ka muuqda heshiisyada ijaarka ama heshiisyada iibka, qaansheegashooyinka qeybiyayaasha ama qalabka laga helo alaab-iibiyayaasha, ama qaansheegashooyinka qandaraasleyaasha ee khuseeya dhismaha ama dib-u-dayarctirada, waa in lagu daraa.

<b>Lifaaqa</b>	
Liiska Xogta Ku Jirta:	
A)	Taariikh Hawleedka Mulkiilaha
B)	Qoraal Maaliyadeedka Shaqsiyeed
C)	Canshuur-celinada Shaqsiyeed ee 3 Sano La Soo Dhaafay
D)	Heshiiska Diiwaangelinta iyo Hawl-socodsiiinta Shirkadda (LLC) ee La Soo Jeediyay
E)	Nuqulka Heshiiska Gadashada iyo Iibka
F)	Qaansheegashooyinka Qandaraasleyaasha (Mas'uuliyadaha)
G)	Qaabka Qorshaha Dhulka
H)	Qaansheegashooyinka iibiyayaasha iyo Alaab-qeybiyayaasha (Hawgallada)
I)	Liiska Cuntada iyo Qiimaha Cuntooyinka Fudud ee La Soo Jeediyay
J)	Liiska Ilaha Dhigaalada Loo Adeegsaday Qorshaha Ganacsiga

Bogga 15

Waa inaad ku darto dukumeenti kasta oo sharciyeed oo khuseeya aasaaska ganacsigaaga

- Iskiis-u-shaqeystaha waa inuu ka diiwaangashanaado magaaladiisa
- Iskaashiyada ganacsi waa inay lahaadaan heshiisyada shuraako
- Shirkadaha Mas'uuliyadaha Xaddidan Leh (LLCs) waa inay lahaadaan heshiisyada hawl-socodsiiinta
- Shirkadaha waa inay lahaadaan Qoddobo Sharciyeed iyo Xeer-hoosaadyo

Markaad cilmi-baaris ku samaynayso qorshaha ganacsigaaga, hubi inaad xusto halka aad ka helayso macluumaadka. Hadday tahay mareeg ama buug, qor cinwaanka ama ciwaanka buugga iyo qoraaga. Samaynta arrintan waxay leedahay labo faa'iido, 1) qof kasta wuu xaqiijin karaa macluumaadka iyagoo dabagalayo isha aad ka heshay iyo 2) haddii aad u baahan tahay inaad dib-u-cusbooneysiiso qorshaha ganacsigaaga goor dambe, waxaad horay u haysataa tilmaamo fiican oo ku saabsan halka aad ka raadin karto.

Haddii aad qorshahan u qorayso ganacsi jira, markaa waxaad u baahan doontaa inaad ku darto ilaa 3 sano oo canshuur-celinada ganacsi ee la soo dhaafay. Intaas waxaa dheer, waa inaad ku dadaasho inaad ku darto soo koobista iibka iyo kharashaadka la soo dhaafay macluumaad taariikheed oo 3 sano ah qeybta maaliyadda. Tani waxay kaa caawinaysaa bixinta caddeynta kharashaadka mustaqbalka ee ganacsiga jira.

Tusaalooyinka waxyaabaha kale ee lagu dari karo Lifaaqa waa: nuqullada qandaraasyo kasta, waraaqaha ujeeddada leh, macluumaadka shatiyada hindiseed, horxogta suuqgeynta ee aan lagu muujin qeybta suuqgeynta, macluumaadka shatiga, iwm.

*Tabaha Ganacsiga: Haddii aad ku dadaasho inaad ku darto xog badan oo aad u malayso inuu bangigu rabo (taariikh hawleedka, canshuur-celinada, qoraal maaliyadeedka shaqsiyeed, iwm) markaa waxaad si weyn u dhimi doontaa waqtiga ay tahay inaad sugto go'aanka.*

Buug-yarahan waxaa soo saaray:



Xarumaha Horumarinta Ganacsiyada Yaryar ee Maine (The Maine Small Business Development Centers) ayaa qayb ahaan la maalgeliyaa iyadoo loo marayo Heshiiska Iskaashiga ee kala dhexeeya Dawladda. Maamulka Ganacsiyada Yaryar. Ra'iyiyada, gabagabooyinka, iyo/ama talooyinka oo dhan ee halkan lagu xusan waxaa leh qoraa-ga(yaasha) oo kama turjumayaan aragtida SBA.

**Maine Small Business Development Centers**

55 Exeter Street

PO Box 9300

Portland, ME 04104-9300

207-780-4420

800-679-7232

[mainesbdc@maine.edu](mailto:mainesbdc@maine.edu)

[www.mainesbdc.org](http://www.mainesbdc.org)